

## OGAYSIIS DHAGAYSIGA DADWEYNAHA

### ISBAHAYSIGA DEGMADA SAN DIEGO

#### WARBIXINTA WAXQABADKA IYO QIIMEYNTA SANADLAHA AH EE LA ISKU DARAY 2022-23

#### DEEQDA HORUMARINTA BULSHADA, ISKAASHIYADA MAALGASHIGA GURYAHA, FURSADAHA GURYAHA EE SHAKHSIYAADKA QABA BARNAAMIYADA DEEQDA XALLINTA XAALADAHA DEGDEGGA AH IYO AIDS

Waxaa halkaan lagu bixinayaa ogeysiis ah in Guddiga Kormeerayaashu ay qaban doonaan dhegeysi dadweyne markay tahay 9:00 a.m. taariikhduna tahay Sebtembar 12, 2023, qolka 310 ee Xarunta Maamulka Degmada, 1600 Pacific Highway, San Diego, CA dhagaysigaas oo ku saabsan Warbixinta Waxqabadka iyo Qiimaynta Sannadlaha ah (CAPER) ee Sannad Maaliyadeedka (FY) 2022-23.

Sannad kasta, degmadu waa in ay soo gudbisaa CAPER oo qeexaya waxqabadyada barnaamijka intii lagu jiray sanad maaliyadeedkii hore, waxqabadyadaas oo la xiriira Deeqaha Horumarinta Bulshada (CDBG), Iskaashatada Maalgashiga Guryaha (HOME), Deeqaha Xallinta Xaaladaha Degdegga ah (ESG), iyo Fursadaha Guryaha ee Shakhsiyaadka qaba barnaamijyada AIDS-ka (HOPWA). Barnaamijyada CDBG iyo ESG ee "Degmada Magaalada" San Diego waxay maalgalayaan guriyeynta, horumarinta bulshada, iyo adeegyada iyo waxqabadyada guri la'aanta ee aagga aan la wadaagin iyo lix magaalo oo ka qaybqaata barnaamijyada (Coronado, Del Mar, Imperial Beach, Lemon Grove, Poway, iyo Solana Beach). Barnaamijka Dalada Guryaha HOME ee Degmada San Diego waxay bixisaa lacag loogu talagalay hawlaha guryeynta ee aagagga Barnaamijka ESG iyo CDBG iyo sidoo kale lixda magaalo ee Dalada (Carlsbad, Encinitas, La Mesa, San Marcos, Santee, iyo Vista). Barnaamijka HOPWA wuxuu bixiyaa maalgelin loogu talagalay guryaha iyo adeegyada la xiriira guryaha ee loogu talagalay dadka la nool cudurka HIV/AIDS iyo qoysaskooda ee dhamaan gobolka San Diego.

Dadweynaha waxaa lagu martiqaadayaa inay ka soo qaybgalaan dhageysiga dadweynaha si ay faallooyin uga bixiyaan CAPER 2022-23. Dadweynaha waxay sidoo kale bixin karaan faallooyin qoraal ah inta lagu jiro xilliga faallooyinka ee 15-ka maalmood ah ee dhammaanaya Sebtembar 12, 2023. CAPER waxaa khadka looga geli karaa halkaan [www.sdhcd.com](http://www.sdhcd.com).

Faallooyinka qoraalka ah waa in lagu hagaajiyaa Hay'ada Adeegyada Guriyeynta iyo Horumarinta Bulshada, Qaybta Horumarinta Bulshada, 3989 Ruffin Road, San Diego, CA 92123, (858) 694-8756, ama waa in iimayl ahaan loogu diraa: [Community.Development@sdcountry.ca.gov](mailto:Community.Development@sdcountry.ca.gov). Dadka dhegaha la'a ama maqalka uu ku adag yahay waxay waaxda kala xiriiri karaan lambarka (866) 945-2207. Dadka u baahan in laga caawiyo ka qayb galka kulanka (aan Ingiriisiga ku hadlin, maqalkoodu culus yahay, iwm.) waa inay la xiriiraan shaqaalaha ugu yaraan shan maalmood kahor intaan la gaarin kulanka si ay u codsadaan wixii qabanqaabo gaar ah.